**Xeerka Maamuleed, ee 5$^{ta}$ Maajo 1960, lamba. 24 diw.**
**Matadawiciin loo qorayo Xoogga Dalka Soomaaliyed**

**Guddoonka Golaha Wasiirrada**

**WASIIRKA KOWAAD**

Markuu arkay Sharciga 6 Abiriil 1960, lamba. 15;
Markuu arkay Xeerka – sharci, ee 4$^{ta}$ Maajo 1960, lamba. 5;
Markuu garwaaqsaday in ay tahay in la qoro mutadawiciin dhan 2.000, oo kuruud ah, oo loogu talagalay in ay ka mid noqdaan, ayaga oo lagu darayo Kooxda (Ururka) Daraawiishta, Cutubyada ugu horreeya, ee Xoogga Dalka, ee Soomaaliya;
Markuu dhegeystay Golaha Wasiirrada;

**WUXUU XEERINAYAA**

Waxaa la soo bandhigayaa tartan loo gelaayo qorista 2.000 oo mutadawac oo loo qoranaya Xoogga Dalka Soomaaliya, kuwaas qoraalka bandhigidda tartanka, eek u lifaaqan oo, Xeerkan lagu ansixinaayo.

Muqdisho, 5$^{ta}$ Maajo 1960.

Wasiirka Kowaad
**Cabdullaahi Ciise Maxamuud**

Markuu arkay oo Diwaageliyey-

Diw. lamba. 22 – xaashi lamba. 60.

Hanti-dhowraha: **Spadaro**

**SII-WAD**

**GUDDOONKA GOLAHA WASIIRRADA**

**OGESIISKA TARTANKA QORISTA 2.000 MUTADHAWICIIN LOO QORAYO CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYEED.**

**1. — Tirada jagooyinka la geliyey tartanka iyo qoondooyinka gobollada.**

Waxaa la soo badhigay 2.000 askari 00 mutadhawiciin ah oo loo qorayo Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

Qoondooyinka Gobollada waxaa loo gooyey sida soo socota:

| | |
|---|---|
| — Gobolka Mijuurtiniya | tiro 300 |
| — Gobolka Mudug | “ 300 |
| — Gobolka Hiiraan | “ 300 |
| — Gobolka Banaadir | “ 500 |
| — Gobolka Jubbada Sare | “ 300 |
| — Gobolka Jubbada Hoose | “ 300 |

**2. — Shuruudaha laga doonayo rajada ka qaba qorashada askarta**

Sí ay uga qaybgalaan tartanka askar-qorista, rajada ka qaba (ka-dhursugayaasha) waa:

a) in ay yihiin muwaadiniin soomaaliyeed, oo laba ah;
b) in ay buuxiyeen, sanad socda, 18 sano, kana weyneyn 25;
c) in ay yihiin doobab
d) in ay leeyihiin joog aan ka gaabneyn 1. 70 mt iyo wareegga xagga xabadka aan ka hooseyn 80 ct: si kastaba aan ka hooseyn 75 ct. In ay gaareen koritaan jir ee isku

miisaaman, ayna ka maran yihiin cillado xagga xubnaha iyo habdhiska jirkooda oo waxyeello u yeelan kara u-qalmiddooda shaqada (adeegga) ciidanka (militeriga);

e) in ay masuuliinta awoodda iyo ikhtisaaska u le ka heleen caddeyn asluub wanaag;
f) in aysan ahayn kuwo uu horey ugu dhacay xukun ciqaab oo la xiriira fal-demyeed ulakac ah;
g) in aysan ahayn kuwo horey lagu siidaayey ama looga ruqseeyey, sababo xagga asluubta ama u-qamid laáan, ilaa hadda baaqi ku ah, ciidan ama Ciidamada Qalabka Sida, ee Dowladda.

**3. — Xeerarka loo raacaayo askar-qorista**

Ka-dhursugayaasha (quud-darreynaya) askar-qorista waa in ay Guddoomiyeyaasha Degmooyinka u-geeyaan (qaddimaan) codsi ku qoran warqad caadi ah.
Guddoomiyeyaaha Degmooyinka marka ay qabtaan araajida:

a) waxa ay ku dhaqaaqayaan in ay hubiyaan aqoonsiga tartan-ka-dhursuge kasta, ayaga oo codsiga natiisa dhinac ka raacinaya, caddeyn loogu talagalay;
b) waxa ay ku dhawaaqayaan "inaan la qabanin" codsiyada kuwa ay, iska caddahay, in aysan lahayn shuruudaha ku xusan lamabarka hore, ee 2;
c) codsi kasta oo la oggolaado (qabto) waxa ay siinayaan lambar tixane ah;
d) waxa ay falliiq warqad risiid ah gacanta u gelinayaan tartame kasta oo keenay codsiga la oggolaaday, falliiqaas risiidka ah wata lambar la mida kan la siiyey codsiga laftiisa,ayada oo lagu saleynayo lambar la sheegay, ayaa la goynayaa, kaddibna degmada ku wargelineysaa ttartamaha dhursugaha ah, taariikhda codsiga loo dhiibo Guddiga gobolka, oo degmo ilaa degmo u kala goosha (safra);
e) codsi kasta oo la aqbalo waxa ay dushiisa dame ku qorayaan caddeynta asluub wanaagga, marka la dhegeysto ráyiga (talada) Taliyaha Saldhigga Boliisla, ee awoodda dhul u leh;
f) waxa ay Guddiyada gobollada, ee askar-qorista, u haynayaan dhammaan codsiyada la qabtay oo u kala soocah "kuwa la aqbalay" (oo sida ay isugu xigaan u lambarsan) iyo "kuwa aan la aqbalin". Diiddada Guddoomiyeyaasha degmooyinka ay diidayaan in ay aqbalaan codsiyada qaar waxaa ka furan ashtako qoraal ah oo looga soo horjeedo, oo ay tahay in la qaddimo, shan maalmood gudahood, Guddiga Gobolka, ee askar-qorista: Guddigu waxa uu arrinta góaan ka gaarayaa inta lagu gudajiro muddada uu hawlahiisa ka wado magaal-madax kasta oo degmo. Codsiyada askar-qorashada waxaa la qaadimi (gudbin/geyn) karaa laga bilaabo maalinta ay tahay 10ka Maajo 1960, waxa ayna muddada geynta waxa ay ku egtahay ugu dambeyn maalinta 31ka Maajo 1960.

**4. — Qoondaha loo meeldhigay Caasimada**.

200 dhursuge, oo la siiyey Gobolka Banaadir, taas oo ah qayb dheeraad ku ah qoondihiisa (qayb la eg boqolkiiba 10 isugeynta tirada jagooyinka tartanka la geliyey,waxaa laga qorayaa Caasimada kaliya.

Kala bar oo bar qondaha aan soo sheegnay, yacni 100ka qof, ayaa laga dhex xulayaa kuwa haysta, kasokow shuruudaha lagu tilmaamayo lambarka-2, ee aqoonta xirfadeed ama farsamo (xisaabye - makiinad-qaraace - wadayaasha - makaanikayaal - koronto yaqaan - raadiyaha ku shaqeeya - kalkaaliyayaasha caafimaadka- iwm).
Dhursugeyaasha rumeysan in lagu darayo qeybahaas waa inay caddeeyaan aqoonta mudnaanta leh iyagoo soo-bandhiya shahaadooyin ay ku qaateen ama caddeynta Xafiiska shaqada, ee Degmada, qual hore u qabtay shaqooyin la xiriira kafaaádaas.

100-ka qof oo la soo sheegay ayaa laga soo dhex saarayaa kuwa takhasuska leh oo looga baahan yahay Talisyada iyo qaybaha kala duwan, ee Ciidanka Xoogga Dalka.

Magaalada caasimada ah, sidaa darteed, waa in laga qoro, guud ahaan:

— Tiro dhursugeyaal ah oo u dhigma qoonde-hoosaadka loo la siiyey Degmada Muqdisho;
— 100 dhursuge oo len shuruudo caadi ah;
— 100 codsadeyaal ah oo haysta aqoonta la doorbidayo.

5. — Xulka dhursugayaasha.

Guddiyo Gobollo oo loogu talagalay aska-qorista, ayaga oo badeed tegaya dhammaan magaalo-madaxyada Degmooyinka, ee Gobolka. ayaga loo xilsaaray, ayaa waxa ay ku dhaqaaqayaan baarista caafimaad iyo hubinta aqoonsiga dhursugeyaasha iyo xulidda kuwa u suubban kara in la qoro.

Dhursugeyaasha ku soo baxa in ay qalmaan, waxaa shahaado mudnaan ka leh xagga askar-qorisya ah: muuqaalka dhismaha jirka iyo militerinimo iyo in uu sí sax ah u yaqaan wax akhrinta iyo wax qorista.

Guddiyada askar-qorista waa la oggol yahay, si ay si wanaagsan ugu gutaan hawlahooda, in ay qoondaha dadka askarta loo qorayo, oo lagu gooyey lr. 6, ee gobol kasta, ugu kala qaybiyaan dhammaan Degmooyinka Gobolka, kuwaas oo mid kasta ay tahay in loogu kordhiyo qoonde-hoosaadkiisa markii hore loogu qoondeeyey.

Haddii ay dhacdo, hal Degmo oo degmooyinka ka mida, in tirada ka dhursugeyaasha tartanka askar-qorista, ee noqday kuwo u qalma oo la qori karo, ay noqoto mid ka hooseysa qoonde-hoosaadka dadka u suubanaada in qoro oo loo dejiyey Degmada lafteeda, farqig qoonde-hoosaasdkiisaa ka soo baxa waxaa sí caddaalad ah loogu kala qaybinayaa Degmooyinka Gobolka, oo mid kasta oo ka mida ay tahay in sidaas loo kordhiyo qoonde-hoosaadkii markii hore loogu qoodeeyey.

Kuwa sida hor-dhaca ah loogu doortay in ay ka mid noqdaan askarta la qoray waxaa wargelinaya Guddiyada gobollada, oo sida ugu dhaqsiyaha badan kaddib marka loo sheego taariikhda askar-qorista ( oo ayaga ay u sameynayaan Degmooyinka ay ka soo kala jeedaan iska marka uu wada gooyo (la qabto), dhammaantood, Taliyaha Ciidanka Xoogga.), waa in ay gaaraan xerooyinka tababarka leyliga (dhibowga/kuruudka), ayada o ay ku tegayaan (raacayaan) gaadiid ay u-diyaariyeen Guddoomiyeyaasha Degmooyinka ama Talisyada Militeriga.

Góaannada Guddiyada askar-qoristu waa lagama dcwoodaan.

**6. — Muddada tababarka aasaasiga ah.**

Xeryaha tababarka askarta dhibowga ah waxaa la gelinayaa tababar aasaasi ah oo soconaya muddo lix bilood ah.

Inta lagu gudajiro muddada la soo sheegay, ayada oo lagu saleynayo soojeedinta iyo góaanka lama dacwoodaanka ah, ee Taliyaha Xoogga Dalka, askarta dhibowga ah waxaa laga dul-qaadayaa waajibaadkii ay ku qaadeen qorashada askarta, sababaha soo socda mid ka mid ah awgeed:

a) Baahiyo gaarka ah ee la xaqiijiyay, kaddib codsi la soo qaddimay;
b) u-qalmid laáan xagga jir ah oo ka soo baxday baaritaanno caafimaad oo dheeraad ah, oo askarta dhibowga ah lagu gelinayo xerooyinka tababarka ama sabab la xiriirta cillad xagga maxkaxda ah oo dib ka timid oo waxyeeleyneysa u-qalmidda shuruud láaanta adeegga;
c) asluub-darro;

d) saluug xagga habdhaqanka militari, kaddib soojeedinta Taliyaha xerada, oo uu xaqiijiyey (waafaqay) Taliyaha Ciidanka Xoogga.

**7. — Xilliga tababarka ciidanka iyo tababarrada dheeraadka**

Marka la dhammeeyo muddada tababarka aasaasiga ah, oo soconaya lix bilood, askarta la qoro waxay qaadayaan, iyagoo ku maraya dhaar gaar ah, ballanta in ay gelayaan tababar dheeraada oo soconata afar sano, laga bilaabo taariikhda dhaarta nafteeda.

Dhamaadka xilliga tababarka aasaasiga askartu waxa, ayaga oo codsi qoranaya, waxa ay weydiisan karaan tababarro dheeraad ah oo laba-sanadlayaal ah ilaa la gaaro dáda ugu badan ee derejooyinka kala duwan.

Bixinta tababarrada dheeraadka waxaa lagu diidi karaa, góaanka Taliyaha Ciidanka Xoogga, sababo culus la xiriira asluub-xumi iyo ama waxqabad-darro awgood.

**8. — Macaamilka dhaqaale (mushaarka)**

Inta lagu jiro mudada tababarka aasaasiga ah, askarta la qorayo waxa ay qaadanayaan (helayaan) mushaar la mid ah kan hadda ay qaataan kuwa la qoro ee Ciidamada Booliska.

Inta lagu gudajiro muddada tababarka dheeriga oo afarta sano ah, askarta ka tirsan milatariga waxa qaadanayaan, heerarka kala duwan, mushahar la eg (la mida) kan aasaaska oo ay qaataan kuwa asaagooda, ee Ciidanka Booliska oo lagu kordhiyey wixii gunooyin millatari ah.

Markay dhammaato muddada afarta sano ah, ee tababarkaas, askarta waxaa la siinayaa, bilowga tababarka dheeraadka kuwa aan weydiisan tababarkan, waxaa la siinayaa abaalgud macasalaameyn oo dhan Sh. So. 1.000.

Bilowga dabagal kasta, askarta la xaqiijiyay waxaa loo qoondeynayaa mushaar kordhin ilaa heer la dejin doono.

Askarta la qoro waxa ay leeyihiin, min bilowga tababarka aasaaska ah, mushaar kasokow:

— hoy, dhar. cusbooneysiinta dharka, wixii daaweyn lacag laáan ah iyo daryeelka isbitaaleed oo lacag laáan ah.

**9. — Suurtagalnimo Meekhaan Mihnadeed.**

Muddada afarta sano ah, ee tababarku soconayo, tiro cayiman oo ka mid ah dhibowga la qoray; xagga baahida meleynta iyo ayada oo lagu saleynayo soojeenta Taliyeyaasha qaybha kala, waxa uu , doorasho ama imtixaan, ku gaari karaa dallacaad uu u dallacayo alifle ama laba-alifle.

Ugu yaraan laba sano oo shaqo ah kaddib, askari kasta oo ka tirsan ciidanka oo haysta (buuxiya) shuruudaha looga baahan yahay, ee asluubta iyo kartida, iyo shahaadada looga baahan yahay, waxa uu karaa in ka qabgalo koorisyada imtixaanka loo gelayo sí loo dhigto, ha ahaadeen Soomaaliya gudaheeda ama dibedda, koorsooyin loogu talagalay saraakiil-xigeen iyo saraakiil.

Lix bilood oo tababar ah kaddib, askari kasta, oo ka tirsan ciidanka, waxa uu weydiisan karaa in uu ka qaybgalo wixii koorsooyin takhasus ah, kaddi markuu galo imtixaanno xulitaan xag habdhaqan iyo farsamo oo lagu gelayo Guddi Ciidan ooloogu talagalay hortiisa.

Muqdisho, 5ta Maajo 1960.